DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

# Abuurista Manhaj Macno Leh oo loogu talagalay Fasallada Dhallaanka Tilmaamaha Ka-qaybgalaha

8 Saacadood

Cusbooneysiintii ugu dambeysay Juun 2026

Dhamaan agabka lagu sameeyay maalgelinta Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta waxaa xuquuqdooda leh oo lagu ilaaliyay Pub. L. No. 94-553, 90 Stat. 2541.

**Xuquuqaha daabacaadda iyo Xaddidaadaha Isticmaalka iyo Mas'uuliyadda**

Dhamaan manhajyada ay samaysay Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta, waxaa lagu sameeyay maalgelin dadweyne. Xuquuqda daabacaadda waa la ilaaliyaa, sidaas darteedna lama soo saari karo, lama beddeli karo, lama koobiyeyn karo, lama iibin karo, ama si kale looma qaybin karo iyada oo aan la helin **ogolaansho qoraal** ah oo ka timid Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota. Haddii ay adeegsadaan hay'ado kale oo tababar bixiya, *Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska iyo Adeegyada Daryeelka Caruurta* waa in lagu tilmaamaa inay tahay milkiilaha manhajka. Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota ma bixiso wax dammaanad ah mana aqbasho wax mas'uuliyad ah oo ku aaddan isticmaalkeeda ama natiijooyinkeeda.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:
DCYF.Child.Care@state.mn.us

## Qiimeynta Tababarka

Dhawr maalmood ka dib kulanka ugu dambeeya, waxaad Develop ka heli doontaa iimayl lagaaga codsanayo inaad dhammaystirto qiimayn tababar oo oonleen ah oo ku saabsan munaasabaddan oo lagu magacaabo Nidaamka Qiimeynta Tabamacalinka io Tababarka (Training and Trainer Evaluation Tool, TTET). Runtii waxaan kaaga mahadcelineynaa taladaada ku saabsan waxqabadka tababaraha, macluumaadka ku jira iyo jawiga tababarka si aan u sameyno horumar inta aan ku guda jirno. Waxaan isticmaalnaa jawaab celintaada marka aan dib u eegno koorsooyinka oo aan jadwal u sameyno bandhigyada tababarka.

## Guudmarka Qaybta 1

### Aagga Mawduuca KCF:

Qaybta Mawduuca KCF II.A: Abuurista Khibrado Waxbarasho oo Wanaagsan

### Qaybta Mawduuca CDA:

Qaybta Mawduuca CDA II: Tallaabooyinka Lagu Horumarinayo Korriinka Jidheed iyo Garashada Carruurta

### Qeexitaanka Koorsada:

Naqshadee manhaj dhallaanka oo tayo sare leh kaas oo qadariya baahiyaha, danaha, awoodaha, iyo kartiyaha carruurta, kuna dhex jira deegaan dhaqan ahaan la jaanqaadaya. Sahami xeeladaha waxbaridda ula-kaca ah ee kobciya luuqadda, akhris-qoraalka, isgaarsiinta, iyo xirfadaha fikirka heerka sare. Baar muhiimadda xiriirradu u leeyihiin kobcinta Waxbarashada Carruurta iyo hab-dhaqannada hagidda wanaagsan ee taageera horumarka bulsheed iyo shucuureed, kana qayb qaata guushooda waxbarashada iyo nolosha.

### Ujeeddooyinka Waxbarashada - Kulanka 1 aad

Dhammaadka koorsadaan, ka-qaybgalayaasha sida firfircoon uga qaybqaata waxay:

- Naqshadayn doonaan goobo dhallaanka oo tayo sare leh kuwaas oo kobciya horumar caafimaad qaba iyo waxbarasho farxad leh.
- Abuuri doonaan fasallo dhaqan ahaan la jaanqaadaya oo ka tarjumaya isla markaana xaqiijinaya sifooyinka iyo duruufaha carruurta, qoysaska, iyo bulshooyinka loo adeegayo.

### Dulmarka Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista Ujeedooyinka |
| **B** | 35 daqiiqo | Naqshadaynta goobo Waxbarasho oo Taageero Leh |
| **C** | 30 daqiiqo | Kobcinta Waxbarashada Carruurta Iyadoo la Adeegsanayo Goobaha Xiisaha |
| **D** | 30 daqiiqo | Abuurista Fasallo Dhaqan ahaan La Jaanqaadaya |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Qeexida Manhajka Waxbarashada

Manhajka waxbarashadu wuxuu bixiyaa hagitaan ku saabsan waxa la barayo iyo sida loo barayo. Manhajka waxbarashadu wuxuu bixiyaa hagitaan ku saabsan waxa la barayo iyo sida loo barayo. “Wuxuu ka kooban yahay yoolal iyo natiijooyin waxbarasho oo ku habboon heerka korriinka carruurta isla markaana muhiim u ah waxbarashada, iyo sidoo kale dhammaan qaybaha deegaanka, agabka, ciyaarta, waayo-aragnimada waxbarasho, iyo isdhexgalka la qorsheeyey ee kor u qaada Waxbarashada Carruurta iyo gaaritaanka yoolalka iyo natiijooyinka la cayimay” (Freidman, Wright, &  Masterson, 2022, p. 215).

## Sifooyinka goobaha Taageerada Leh

- Ku salaysan ilmaha: “Waxaan halkaan ku arki karaa naftayda, halkanna waan ka tirsanahay.”
- Habaysan oo la saadaalin karo: “Waxaan ku kalsoonaan karaa inaan garanayo halka ay wax yaallaan iyo waxa aan filan karo.”
- Deggan oo soo jiidasho leh: “Halkan waxaan ku dareemi karaa xasillooni.”
- Ammaan ah oo caafimaad qaba: “Halkan waxaad ku tahay ammaan, waana lagu qiimeeyaa.”
- Taageera isku-filnaanshaha: “Tan waa meel aan wax ku baran karo kuna kori karo.”
- Dhisa bulshada: “Halkan waxaan ku dhisi karaa xiriirro.”
- Lagu qalabeeyay agab ujeeddo leh oo soo jiidasho leh: “Tan waa meel xiiso iyo loollan leh!”
- Dhiirrigeliya dhaqdhaqaaqa iyo isu-socodka: “Tan waa meel aan ku dhaqaaqi karo oo aan jidhkayga ku isticmaali karo!”

## Kobcinta Waxbarashada Carruurta Iyadoo la Adeegsanayo Goobaha Xiisaha

Sidee ayay goobahaaga xiisuhu u taageeraan uguna sii dhisaan xirfadaha carruurta sida lagu qeexay ECIPs? Sidee ayaad u kobcin kartaa goobahaaga xiisaha si aad u sii horumariso korriinkooda iyo waxbarashadooda? Qor saddex yool oo lagu kobcinayo goobahaada waxbarasho.

- 
- 
- 

## Naqshadaynta goobo Ka Tarjumaya Kala-duwanaanshaha

Ka fakar weedhahan muhiimka ah: Maxay oraahdaan muhiim u tahay? Sidee ayuu fasalkaagu u dabaqaa mabda'an?

- "Waxbarashada dhallaanka ee tayada leh waxay taageertaa horumarka ugu wanaagsan ee ilmo kasta iyada oo aan loo eegin dakhliga, kartida, isirka, dhaqanka, ama naafonimada" (ECIPS, 2028, p. 9).
- Manhaj tayo sare leh "wuxuu waayo-aragnimooyinka nololeed ee carruurta uga tarjumaa sida muraayad si ay carruurtu u arkaan naftooda, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda oo matalan." (NAEYC, 2022, p. 218).
- Manhaj tayo sare leh wuxuu carruurta u furaa daaqado ay dunida ka eegaan si ay wax uga bartaan dad, goobo, aragtiyo, iyo fikrado aysan weli la kulmin (NAEYC, 2022).
- Cilmi-baaristu waxay tilmaamaysaa qaybaha muhiimka ah ee fasallada dhaqan ahaan la jaanqaadaya, oo ay ku jiraan suugaanta dhaqamada kala duwan, goobo dhaqan ahaan la jaanqaadaya, ka qaybgalka qoyska, iyo hab-dhaqannada dhismaha bulshada (Bennett et.al., 2025).

## Dhaqan-gelinta Dhabta ah: Shaqada Goobta

Ka fakar fikradaha cusub ama aragtiyaha la sii hagaajiyay ee aad kala baxday wada-hadalladeenna. Maxay yihiin waxyaabaha aad qorshaynayso inaad samayso adiga oo ku salaynaya wixii aad ku tababbaratay koorsadan? Qor 1 ama 2 yool oo aad isla markiiba ka hirgelin doonto fasalkaaga.

1. 

2. 

# Guudmarka Qaybta 2aad

## Ujeeddooyinka Waxbarashada – Kulanka 2 aad

Dhammaadka koorsadaan, ka-qaybgalayaasha sida firfircoon uga qaybqaata waxay:

- Qorshayn doonaan manhaj adeegsanaya nuxur macno leh oo waafaqsan heerarka waxbarashada, isla markaana daboolaya baahiyaha iyo danaha ilmo kasta.
- Sahami doonaan xeeladaha waxbaridda ula-kaca ah ee taageera oo kobciya horumarka iyo Waxbarashada Carruurta.

## Dulmarka Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista Ujeedooyinka |
| **B** | 30 daqiiqo | Qorshaynta Jadwallo, Hawl-maalmeedyo, iyo Kala-guurro Wax-ku-ool ah |
| **C** | 40 daqiiqo | Naqshadaynta Manhaj iyadoo la Adeegsanayo Nuxur Macno Leh |
| **D** | 25 daqiiqo | Dhisidda Aqoonta iyadoo la Adeegsanayo Xeeladaha Waxbaridda Ula-kaca ah |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga:<br>2 saacadood | |

## Qorshaynta Hawl-maalmeedyo iyo Kala-guurro Wax-ku-ool ah

Samee qorshe cashar oo qeexaya kala-guur wax-ku-ool ah oo taageeraya hawl-maalmeedka fasalkaaga.

| Hawl-maalmeedka | Hawsha Kala-guurka | Qaybta ECIPs ee Laga Hadlay | La-qabsiga loogu talagalay ilmo kasta |
|---|---|---|---|
| Tusaale: Ka soo gudbidda ciyaarta bannaanka oo loo gudbayo wakhtiga wareegga gudaha. | Macalinku wuxuu carruurta ku martiqaadaa inay u socdaan sida xayawaanka ay ugu jecel yihiin oo ay saf ugu galaan albaabka hortiisa. | Qaybaha P1-5: Dhaqdhaqaaqa Murqaha Waaweyn | Hal ilmo ayaa u baahan hagitaan dheeraad ah si uu uga soo gudbo ciyaarta bannaanka, sidaas darteed macalinku wuxuu kooxda siiyaa ogeysiis 2 daqiiqo ah si uu ugu sheego inay dhowaan tahay wakhtigii gudaha loo geli lahaa. |
| | | | |

## Abuurista Manhaj Macno Leh

Adeegsiga Wareegga Qiimaynta si Wax Loo Qorsheeyo:

- Ku ururi macluumaad ku saabsan waxbarashada iyo horumarka carruurta adiga oo adeegsanaya indho-indhayn.
- Diiwaangeli waxa la arkay ama la bartay si loo kaydiyo macluumaadka ku saabsan waxa carruurtu yaqaannaan iyo waxa ay samayn karaan.
- Ka fakar macluumaadkan si aad go’aanno uga gaarto waayo-aragnimooyinka waxbarasho iyo isdhexgallada sida ugu wanaagsan u taageeraya ilmaha ama kooxda.
- Hirgeli go’aannadan adiga oo adeegsanaya qorshayn ula-kac ah iyo hababka waxbaridda.

## Adeegsiga Jaantuska KWL ee Qorshaynta

Jaantuskaan wuxuu ka caawiyaa macalimiinta inay diiwaangeliyaan oo ay si qoto dheer u fahmaan waxa carruurtu hore uga yaqaannaan mawduuc, waxa ay doonayaan inay ka ogaadaan, iyo inay ururiyaan oo ka fiirsadaan waxa carruurtu barteen marka daraasaddu dhammaato.

| K - Maxaad ka taqaanaa? | W - Maxaad doonaysaa inaad ogaato? | L - Maxaa soo baratay? |
| --- | --- | --- |
| | | |
| Fikradaha Waawayn: | | |

## Dhisidda Aqoonta iyadoo la Adeegsanayo Xeeladaha Waxbaridda Ula-kaca ah

Macalimiintu waxay xiriir la sameeyaan carruurta oo ay waxbarashadooda sii ballaariyaan iyaga oo adeegsanaya habab dhowr ah, oo ay ka mid yihiin:

- Aqoonsiga isgaarsiinta carruurta iyo xiriir la samaynta iyaga oo wada-hadal lala yeesho
- Dhiirrigelinta adkaysiga iyo dadaalka
- Bixinta ra'yi-celin gaar ah
- Tusidda habab kala duwan oo dhibaatooyinka lagu xalliyo
- Bixinta tusaalooyin la daawan karo
- Ku darista loollan si loo kordhiyo heerka kakanaanta/taageerada tallaabo-tallaabada ah
- Yaraynta kakanaanta si loo xoojiyo xirfadaha hadda jira
- Weydiinta su'aalo kicinaya yaab iyo fikir
- Adeegsiga waxbarid ula-kac ah iyo tilmaamid toos ah
- Dhiirrigelinta taageerada asaagga

## Milicsiga Ugu Dambeeya

- Waxa iigu muhiimsanaa ee aan ka bartay:

- Hal dhaqan ama fikrad aan qorshaynayo inaan toddobaadkan hirgeliyo:

## Dhaqan-gelinta Dhabta ah: Shaqada Goobta

Inta aad la shaqaynayso carruurta yaryar, aqoonso hal tusaale oo muujinaya sida aad tilmaamid toos ah ugu adeegsatay taageeridda Waxbarashada Carruurta iyo hal tusaale oo muujinaya sida aad ilmo ugu hagaysay dhisidda aqoonta. Qorshee inaad tusaalooyinkaaga la wadaagto kulanka 3.

# Dulmarka Kulanka 3

## Ujeeddooyinka Waxbarashada – Kulanka 3

Dhammaadka koorsadaan, ka-qaybgalayaasha sida firfircoon uga qaybqaata waxay:

- Aqoonsan doonaan wada-hadallada ula-kaca ah iyo fursadaha waxbarid ee taageera horumarka luuqadda, akhris-qoraalka, iyo isgaarsiinta carruurta.
- Soo bandhigi doonaan xeelado lagu kobcinayo fikirka heerka sare iyada oo loo marayo isdhexgalka dadka waaweyn iyo carruurta.

### Dulmarka Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo-dhaweyn/Ujeeddooyin |
| **B** | 35 daqiiqo | Adeegsiga Wada-hadallo Ula-kac ah si Loo Ballaariyo Waxbarashada |
| **C** | 40 daqiiqo | Taageeridda Fikirka Heerka Sare iyadoo la Marayo Isdhexgalka Dadka Waaweyn iyo Carruurta |
| **D** | 20 daqiiqo | Qiimaha Ra'yi-celinta Tayada Leh |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

## Marxaladaha Wada-hadalka Ula-kaca ah

| Marxalada | Hadalka baraha | Wada-hadalka Ula-kaca ah |
|---|---|---|
| macalinku wuxuu carruurta ku dhiirrigeliyaa inay alaabta carruurtu ku ciyaarto soo ururiyaan inta lagu jiro wakhtiga nadaafadda. | “Fadlan baloogyada meeshooda ku celi.” | |
| Carruurtu waxay dhaqayaan gacmahooda ka hor inta aysan qadada cunin. | “Waa wakhtigii aad gacmihiinna u dhaqi lahaydeen qadada.” | |
| Carruurtu waxay ku hawlan yihiin hawl farshaxan oo geeddi-socod ku salaysan oo leh agabka isku-dhejinta. | “Iiga warran waxa aad samaysay.” | |
| Ilmo ayaa soo gaaraya maalintaas, wuxuuna aad u xiisaynayaa inuu sahamiyo goobta cusub ee dabiicadda iyo daahfurka. | “Tag oo jaakaddaada sudh.” | |
| Ilmo ayaa si muuqata u murugaysan oo bilaabaya inuu ooyo marka laga codsado inuu kooxda kula biiro wakhtiga sheekada. | “Ereyadaada adeegso.” | |

## Taageeridda Bartayaasha Labada luuqadood

- Waa maxay waayo-aragnimadaada ku saabsan ka qaybgelinta bartayaasha labada luuqadood ee fasalkaaga?
- Sidee ayaad carruurta u taageertaa marka ay baranayaan luuqado badan?
- Maxay yihiin qaar ka mid ah hababka aad luuqadaha iyo dhaqamada guriga ugu soo dhexgelin karto fasalkaaga?

## Ballaadhinta Waxbarashada Carruurta Iyadoo loo Marayo Horumarinta Fikradaha

Hawl kasta oo ku taxan, samee su'aalo aad carruurta weydiin karto si aad ugu dhiirrigeliso inay fikirkooda sii qoto-dheereeyaan.

| Hawsha | Falanqaynta iyo Sababaynta | Abuurista | Isku-dhafka | Xiriirka Dunida Dhabta ah |
|---|---|---|---|---|
| Biyo lagu shubayo dubladaha oo lagu ridayo weelasha | Maxaad dareemaysaa marka aad biyaha si dhakhso badan u shubto? | Sideen u beddeli karnaa midabka biyaha? Waa maxay agabka aan adeegsan karno? | Hore ma u isticmaashay dublad? Iiga warran. | Sidee ayaad biyaha guriga ugu isticmaashaa? |
| Indho-indhaynta shimbiraha jooga goobta quudinta shimbiraha | | | | |
| Wax ku dhisidda baloogyada birlabta leh | | | | |
| Ku ciyaarista barafka | | | | |

## Milicsiga Ugu Dambeeya

- Hal aragti cusub oo aan ka helay wada-hadallada iyo hawlaha kulankan:

- Hal xeelad oo aan si ula-kac ah ugu dari doono manhajkayga:

- Hal su’aal ama fikrad oo aan jeclaan lahaa inaan sii sahamiyo:

## Dhaqan-gelinta Dhabta ah: Shaqada Goobta

Dib u eeg manhajkaaga oo dooro hawl, isdhexgal, ama waayo-aragnimo waxbarasho. Aqoonso hal fursad oo lagu xoojin karo horumarinta fikradda adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah afarta xeeladood: falanqaynta iyo sababaynta, abuurista, isku-dhafka, ama xiriirro macno leh oo dunida dhabta ah. Ku dabaq xeeladda adiga oo ilmaha fasalkaaga kula yeelanaya isdhexgal ula-kac ah. U diyaargarow inaad la wadaagto waayo-aragnimadaada, oo ay ku jiraan isdhexgalkiinna, sida ilmuhu uga jawaabay, iyo waxa aad baratay.

# Dulmarka Kulanka 4

## Ujeeddooyinka Waxbarashada – Kulanka 4

Dhammaadka koorsadaan, ka-qaybgalayaasha sida firfircoon uga qaybqaata waxay:

- Kobcin doonaan Waxbarashada Carruurta iyaga oo abuuraya bulshooyin daryeel leh oo ay carruurtu ku dareemaan ammaan, qiimeyn, iyo taageero.
- Sharxi doonaan farsamooyinka hagidda wanaagsan ee taageera horumarka bulsheed iyo shucuureed ee carruurta, xoojiya xiriirrada, kana qayb qaata guusha guud ee carruurta ee waxbarashada iyo nolosha.

### Dulmarka Koorsada:

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah |
|---|---|---|
| **A** | 20 daqiiqo | Soo-dhaweyn/Ujeeddooyin |
| **B** | 30 daqiiqo | Xiriirrada Jawaab-celinta Leh Waxay Taageeraan Waxbarashada Carruurta |
| **C** | 20 daqiiqo | Abuurista Bulshooyin Bartayaal ah oo Daryeel Leh |
| **D** | 35 daqiiqo | Taageeridda Horumarka Bulshada iyo Shucuurta iyadoo la Adeegsanayo Hagidda Hab-dhaqanka Wanaagsan |
| **E** | 15 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | |

# Abuurista Bulshooyin Daryeel Leh iyadoo la Adeegsanayo Manhajka

| Aqoonso xirfadaha saaxiibtinimo ee ilmuhu u baahan yahay in laga caawiyo kobcintooda. | Hel qaybta iyo tilmaamaha ECIPs ee la xiriira xirfaddan. | Qorshee hawl, waayo-aragnimo waxbarasho, ama isdhexgal ilmaha ka caawinaya inuu xoojiyo xirfaddan. |
|---|---|---|
| | | |

## Helidda Macnaha Ka Dambeeya Hab-dhaqanka

Adeegso qalabkan si aad uga fikirto hab-dhaqanka carruurta oo aad u aqoonsato siyaabaha lagu taageerayo maaraynta shucuurta carruurta.

| Sharax waxa dhacay, oo ay ku jiraan cidda ku lug lahayd, waxa dhacay, iyo goorta iyo meesha hab-dhaqanku ka dhacay. | Ka fakar waxa laga yaabo inuu saameeyay hab-dhaqanka ilmaha. Ma jirtaa baahi aan la daboolin, xirfad soo koraysa, mise ilmuhu wuxuu ka jawaabayaa goobta ama hawl-maalmeedka? | Sidee ayuu macalinku uga jawaabi karaa si deggan oo ixtiraam leh oo daboolaysa baahiyaha ilmaha, isla markaana taageeraysa waxbarashadiisa iyo horumarkiisa? |
|---|---|---|
| macalinku wuxuu ogaadaa in maalin kasta 10:30 am, Deondre uu bilaabo inuu muujiyo hab-dhaqanno ay ka mid yihiin oohin, cabasho, iyo mararka qaarkood garaacista asaaggiisa. | Maadaama Deondre uu yimaado ka dib wakhtiga cuntada fudud ee subaxda, macalinka daryeelka carruurtu wuxuu la xiriiraa qoyska si uu u weydiiyo in Deondre uu gaajaysan yahay ama daallan yahay. Waxay macalinka u sheegaan in Deondre uu inta badan subaxdii soo daaho hurdada oo uu quraacda ka tago. | macalinku wuxuu qorshaynayaa inuu Deondre siiyo cunto fudud marka uu yimaado goobta daryeelka carruurta si loo hubiyo in baahidiisa aasaasiga ah ee nafaqada la daboolay. |
| | | |
| | | |

## Milicsiga Koorso

Qaado dhowr daqiiqo si aad uga fiirsato safarkii aan soo marnay ee ku aaddanaa hirgelinta manhaj macno leh ee barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoysaska.

- Wadahadalladii ama hawlihii intii uu koorsadaan socday kee ayaa sida ugu weyn maskaxdaada ugu soo dhacay? Maxay adiga kuu saameeyeen?

- Waa maxay isbeddellada aad samaysay, ama aad qorshaynayso inaad ku samayso, deegaankaaga, hab-dhaqannadaada, aragtidaada ama hawlahaaga, taas oo ka dhalatay koorsadan?

- Waa maxay natiijooyinka wanaagsan ee aad filayso inay ka dhashaan isbeddelladan?

## Fikradaha Ugu Dambeeya

Qor bayaan hawleed si uu u xoojiyo yoolalkaaga xirfadeed. Dhammaystir weedhan:

- Hal tallaabo oo aan ka go'an tahay inaan qaado natiijada koorsadan awgeed waa:

- Sababta uu yoolkaan muhiim iigu yahay waa:

## Ilaha

- Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore (Early Childhood Indicators of Progress, ECIPs)
- Helidda Fursadaha Horumarinta Fikradaha ee Manhajkaaga
- Wareegga Weydiimaha
- Bogagga Hore – Beddelidda Xafaayadaha
- U Midooba Akhris-qorista
- Xaashida Talooyinka: Arrimaha Saameeya Hab-dhaqanka
- Xeerka Anshaxa ee NAEYC ee loogu talagalay Macallimiinta Carruurta Yar-yar
- Hagaha Luuqadda Loo Dhanyahay ee Ururka Cilmi-nafsiga Maraykanka